

Magaca Hore \_\_\_\_\_ Magaca Dambe \_\_\_\_\_

Cinwaanka \_\_\_\_\_

Magaalada \_\_\_\_\_ Gobolka \_\_\_\_\_ Summad Boosto \_\_\_\_\_

Waddanka \_\_\_\_\_ Telefoonka \_\_\_\_\_

**Jawaabta  
Goobaab Geli**

- |   |            |             |
|---|------------|-------------|
| 1. Qoftan <i>xasaasiyad maku leeyahay</i> dawooyinka doxycycline ama dawooyinka kale ee tetracycline (“cycline”)?   | <b>Haa</b> | <b>Maya</b> |
| 2. Qoftan <i>xasaasiyad maku leeyahay</i> dawooyinka ciprofloxacin ama dawooyinka kale ee ah quinolone (“floxacin”)?  | <b>Haa</b> | <b>Maya</b> |
| 3. Qoftan <i>xasaasiyad ma ku leeyahay</i> dawooyinka amoxicillin, penicillin ama dawooyinka kal ee (“cillin”) ugu dambayso?  | <b>Haa</b> | <b>Maya</b> |
| 4. Qoftan uur ma leedahay ama ma naasnuujinaysaa?   | <b>Haa</b> | <b>Maya</b> |
| 5. Qoftan ma qaadataa dawooyin kale oo la qoro oo aan ahayn dawooyinka xakamaynta dhalnada ama dawada dhiig karka?  | <b>Haa</b> | <b>Maya</b> |
| Hadday su'aasha 5 ay “Haa” tahay, ka jawaab 5a iyo 5b:  |            |             |
| 5a. Qoftan ma qaadataa tizanidine (Zanaflex), theophylline, ama duloxetine?   | <b>Haa</b> | <b>Maya</b> |
| 5b. Qoftan ma qaadataa isotretinoin, phenobarbital, carbamazepine, primidone, rifampin, phenytoin, ama fosphenytoin?  | <b>Haa</b> | <b>Maya</b> |
| 6. Qoftan dhakhtar ma u sheegay inuu hayo cudurka kelyaha ee joogtada ah ama hawlgab kelyo?   | <b>Haa</b> | <b>Maya</b> |
| 7. Qoftan dhakhtar ma u sheegay inuu qabo xanuunada suuxdin/qalal, cudur difacca-jirka, nerfaha iyo muruqo xanuun joogot ah [myasthenia gravis] ama QT ku-raag leh (cudur wadno la dhaxlo)? | <b>Haa</b> | <b>Maya</b> |

<b>KALIYA CARRUURTA</b>	<b>Da'da (xulo mid)</b>	<input type="checkbox"/> 0-4 toddobaad jir ah (dhasha ah) <input type="checkbox"/> 5 toddobaad ilaa 7 sano jir ah <input type="checkbox"/> 8 sano illaa 17 sano jir
	<b>Culayska</b> (loogu talagalay kaliya carruurta ka yar 76 rodol)	_____ rodollada



**Shaqaalaha Kaliya  
Ayaa Isticmaalaya  
Qeybtan**



**Dawada:**  D  C  A  ½ C  Medical Consult

**Fursadaha kala-doorashada:**  Barax Dawo afka laga qaato  Timaamha Bururinta Doxycycline

**Xarfaha Hore ee Bixiyaha:** \_\_\_\_\_

**Tilmaamaha Qiyaasta Dawada:** \_\_\_\_\_ **Lood lambarka:** \_\_\_\_\_

## Tilmaamaha Foomka Baarista

**Badbaadadaada awgeed, fadlan ugu jawaab su'aalaha oo dhan si sax ah oo dhammaystiran (hal foom qofkiiba).**

Macluumaadka aad bixiso ayaa naga caawin doonta:

- Inaan go'aamino inay badbaado leedahay inaan dawo ku siino
- Inaan go'aaminno nooca iyo qaddarka dawada ugu fiican ee ay tahay in lagu siiyo
- Si laguugu diro bixiyeyaal daryeelka caafimaad, haddii loo baahdo.

**Macluumaadka La Xiriirka:** Markaad bixiso magacaaga iyo macluumaadka lagugula soo xiriirayo ayaa u oggolaanaysa waaxdaada daryeelka caafimaadku inay kula socoto ama adiga ku siiso tilmaamo dheeraad ah, haddii loo baahdo.

**Su'aalaha 1-3:** Noo sheeg waxwaliba dawo kasta ee aad ku leedahay xassasiyad. Calaamadaha xasaasiyadda waxa ka mid noqon kara neefsiga oo dhib noqda, khurufayn, dibnaha ama carrabka oo barara, iyo/ama cuncun ama furuuc daran.

**Su'aasha 4:** Ka jawaabidda su'aashan ayaa naga caawin doonta in aan kuu xulno dawada idiinku badbaadada badan adiga iyo ilmahaaga, haddii aad uur leedahay ama aad naasnuujinayso.

**Su'aasha 5:** Noo sheeg dawooyinka lagu qoray ee aad qaadato. Dawooyinka qaarkood ayaa dhici karta in aanay fiicnayn inaad la qaadato dawooyinka kudka qaarkood. Haddii aadan hubin inaad qaadato mid ka mid ah dawooyinka la qoro ee liis garaysan, weyddii bixiyahaaga daryeel caafimaad ama farmasiistaha.

**Su'aalaha 6-7:** Noo sheeg xaaladaha caafimaad ee ay dhici karto inaad leedahay ee wada qaadashadoodu aanay isku fiicnayn dawooyinka kudka (anthrax) qaarkood. Haddii aadan hubin inaad qabto mid ka mid ah xaaladaha caafimaadka ee liis garaysan, weyddii bixiyahaaga daryeel caafimaad.

**Macluumaadka Ilmaha** - Carruurta waxay u baahan yihiin qiyaas dawo ka yar inta ay qaataan dadka qaangaarka ahi. Bixinta da'da iyo culayska ayaa inaga caawin doonta inaan u xulano qiyaasta dawada ee saxda ah.

### Isticmaal Macluumaad (Ogaysiiska Tennesen )

Shaqaalaha Goobta laga bixinnayo (Point of Dispensing, POD) iyo/ama dhakhaatiirta caafimaadka ayaa laga yaabaa inay marin u helaan macluumaadka aad bixiso. Waaxda Caafimaadka Minnesota (Minnesota Department of Health, MDH), hay'adaha caafimaadka dadwaynaha qabiileed, Hay'adaha caafimaadka dadwaynaha maxalliga ah, iyo Waaxda Maraykanka ee Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, oo ay ka mid yihiin Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (Centers for Disease Control and Prevention, CDC), ayaa sidoo kale laga yaabaa inay marin u helaan macluumaadkan caafimaadka caafimaadka bulshada dartii. Xogta ma siin doono cid kale adiga oo aan ogolaansho bixin.

Ma jirto xil sharci oo adiga kaa saran inaad annaga na siiso macluumaadkan gaarka ah. Haseyeeshee, la'aanteed, waxa laga yaabaa inaad helin wax dawo ah ama dawada adiga kugu habboon.